

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Yoonis iyo
Kalluunkii
Weynaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay

Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Sanado badan ka hor, waxaa jiray nin
ku noolaan jiray waddanka Israa'iil.
Maalin baa, Ilaah wuxuu u sheegay
inuu aado magaalada weyn
ee Nineweh oo ka
mid ahayd


caasimadaha
ug awoodda
badan dunida.




Yoonis wuxuu uga digay dadkii oo idil
ee meeshaa joogay in Ilaah ogyahay
heerka uu gaarsiisan yahay
xumaantooda.



Yoonis wuu diiday Ilaah! Halkii
uu ka aadi lahaa Nineweh,
Yoonis wuxuu raacay dooni
u socotay degta kale ee ka
soo horjeeday meeshaa oo
la odhan jiray Tarshiish.



Rabbiga Ilaaha ah ayaa wuxuu baddii ku daayay
dabayl weyn. Waxaa jiray duufaan xoog badan.
Baxriyiintiina aad bay u abqeen inay doonida
kala dilaacdo oo degto.



Duufaantii way ka sii dartay oo ka sii dartay.
Waa la cabsaday, badmaaxayaashii way baryeen
ilaahyadoodii oo alaabtii doonida saarnayd way
ka rogeen si ay doonida u fududaato. Laakiinse
waxba ma aysan u tarin.




Yoonis wuxuu ahaa qofka keliya ee doonta saaran oo haddana aan Ilaah baryeen. Halkii uu taas ka samayn lahaa, wuxuu iska hurday xagga hoose ee doonta, wuxuuna ku jiray hurdo weyn. Naakhuudihii (Kabtankii) doonta ayaa halkaas ugu tagay isaga. "Hurdahayow, maxaad u jeedaa? Kac! Oo Ilaahaaga bari! Waaba intaasoo uu inaga fikiraa inaannu haligmine."



Baxriyintii (Badmaaxayaashii) durbadiiba waxay go'aansadeen in dhibaataada jirta uu ku lug leeyahay Yoonis. Wuxuuna u sheegay iyaga inuu ka soo cararary Ilaah. Waxayna weyddiiyeen, "Si badu nooga degto aawadeed haddaba bal maxaannu samaynaa?"



“Kor ii qaada oo badda igu dhex tuura,” Yoonis baa sidaa ugu jawaabay. “Waayo, waxaan ogahay in duufaankanweynu daraadeey idiinku soo kacay.”



Baxriyiintii ma aysan doonayn inay badda ku tuuraan Yoonis. Haddaba waxay ku dadaaleen iney xeebta ku soo noqdaan, laakiinse wey kari waayeen. Waxaa jiray oo keliya hal shay inay sameeyaan!



Ka dib baryo cafis weyddiin,
baxriyiintii intay Yoonis kor
u qaadeen oo
waxy ku dhex
tureen baddii.
Kolkaasay
baddii joojisay
cadhadeedii,
mowjadihiina
hoos u dahceen,
oo dabayshiina
tartiib u degtay.




Isbedel degdeg ahna baana ku dhacay
cimiladii oo badmaaxayaashii
aad bay u
cabsadeen si
ka sii badan
markii ay
dabaysha kacsanayd ka
daran. Waxayna ogaadeen
in Ilaah keliya waxaasi
samayn karo. Baqdin iyo
yaab, waxay caabudeen
Rabbiga Ilaah ah.



Ilaa intii laga gaarayay,
addeecid la'aanta
farrinwadihii wuxuu
la kulmay layaab weyn.
Moolkii guntii hoose
ee badda ayuu hoos
ugu degay, Yoonis
waxba iscaawin
karin degiddiisii.
Hoos buu u degay,
aad --- laakiin Ilaah
qorshe kale ayuu lahaa.



Rabbiga wuxuu Yoonis u diyaariyey kalluun weyn oo isaga liqa. Kalluunkii isla wakhtigaaba wuu diyaarsanaa! Oo hal cantuugo oo Yoonis uu kaga baddii oo uu ku galay calooshii kalluunka. Yoonis wuxuu calooshii kalluunka ku dhex jiray saddex habeen iyo sddex maalmood. Wakhti bandanna isagao fikiraya ayuu Ilaah baryayay.



Saddex malmood ka dib, Aakhirkii ballan buu ku galay inuu addecayo Rabbiga. Si toos ah, Ilaah wuxuu la hadlay kalluunkii, oo waxaa lagu soo mantagay xeebta Yoonis.



Kol labaad, baa Ilaah la hadlay Yoonis oo ku yidhi aad Ninewah oo ku wacdi ereyga Ilaah. Markan Yoonis wuu aaday oo dhex-galay magaaladii, isaga oo ku qaylinaya, "Walin waxaa u hadhay afartan maalmood, dabadeed Ninewah waa la afgambi doonaa."



Dadkii reer Ninewah way rumeysteen Ereygii Ilaah. Oo waxay ku dhawaaqeen in la soomo, oo la xirto dhar jooniyada ah oo ay Ilaah ku tusayaan inay ka xun yihiin dembiyadiiay galeen. Xitaaa boqrkii baa Ilaah hortiisa isku hooseysiiyey.



Oo kursigii carshigiisa intuu ka soo kacay ayuu xidhay dharkii jooniyadaha ahaa, oo lu dul fariistay dambas. Oo wuxuu dadakii ku amray in qof walba uu ka soo noqdo dembiyadiisii xunxumaa iyo rabshadihii, oo halaga baryo Rabbiga inuu cafis u fidiyo iyaga.



Ilaah MA cafin Doonaa iyaga! Waxay u ahaan doontaa dadka reer Ninewah maalint layaab leh - cajiib u ah farxad leh markii ay dadkii ogaal hubsadeen in Ilaah cafiyey

iyaga, ...
Laakiin hal qof baa aad u cadhooday.
Yoonis!



Maxay tahay sababta uu Yoonis u xanaaqay?
Wuxuuna ku yidhi Ilaah, "Waan ogaa inaad tahay
Ilaah nimco miidhan ah, oo raxmada ka buxdo, oo
cadhada u gaabiya, oo naxariis badan." Haddii aan
hadalka si kale u dhigno, Yoonis
wuu ogaa in marwalba uu Ilaah
cafiyo dadkiisa kuwa ka
xumaada dembiyadooda
oo addeeca Ereyga Ilaah.
Waxay u ek-tahay inuusan
jecleen dadkii reer
Ninewah. Ma uusan
dooneyn in la cafiyo iyaga.



Yoonis aad buu ugu xanaaqay Ilaah oo wuxuu yidhi, "Nafta ga qaad, waayo intii aan noolaan lahaa waxaa iiga roon inaan dhinto."



Yoonis wuxuu fadhiistay magaalada banaankeedii, oo wuxuu sugayay maalinta maalintaa xigta waxa uu Ilaah samayn doono. Rabbiga Ilaah ahna wuxuu diyaariyey geed ubbo ah, dhaqsuu u koray, hoos siiyey Yoonis inuu kaga hadhsado kuleylka qoraxda.



Subaxdii dambe, Ilaah wuxuu u soo diray dixiri, ii isna geedkii buu dilay. Deedna, Rabbiga wuxuu ku soo daayay kuleyl xad dhaaf ah, oo hanfi daabayl kulul ah wadata ayaa gubay Yoonis ilaa uu u maleey-doonay inuu dhinto.



Dabadeed, Rabbiga wuxuu ku yidhi
Yoonis, "War inaad geedka ubbada u
cadhootid ma lii wanaagsan tahay?
Waxaad u jixijixday geedka
ubbada ah, oo aad u howshoon
oo aadan korinin oo

habeen iska
soo baxay oo
habeen ku
baaba'ay."



“So iima eka inaan u jixinjixo magaalada weyn ee Ninewah, taasoo ay gudaheeda ku nool yihiin dad badan?”



Yoonis iyo Kalluunkii Weynaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yoonis

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

